HELIOS

Taageerada Isdhexgalka Hellenic ee Ka-faa’iideystayaasha Magangalyada Caalamiga ah iyo Ilaalinta Ku Meel Gaadhka Ah

BUUG GACMEEDKA XEERARKA MASHRUUCA

(waxay khusaysaa ka-faa'iidaystayaasha ilaalinta caalamiga ah)

HELLENIC REPUBLIC
Ministry of Migration & Asylum

IOM
UN MIGRATION

JULAAY 2024

Somali Version

HELIOS

Taageerada Isdhexgalka Hellenic ee Ka-faa'iideystayaasha Magangalyada Caalamiga Ah iyo Ilaalinta Ku Meel Gaadhka Ah

HELIOS WAA MASHRUUC IS DHEXGAL AH OO UJEEDADIISU TAHAY IN LAGU TAAGEERO **KA-FAAIIDEYSTAYAASHA MAGANGALYADA CAALAMIGA AH** (QOXOOTIGA IYO KA-FAAIIDAYSTAYAASHA MAGANGALYO HOOSAADKA) **iyo KA-FAAIIDEYSTAYAASHA ILAALINTA KU MEEL GAADHKA AH SI AY UGU DHEX MILMAAN AMA DHAXGALAAN BULSHADA GIRIIGA.** MASHRUUCU WUXUU BIXIYAA ADEEGYO DHIIRIGELINAAYA NOLOL MADAX-BANAAN, OO AY KU JIRAN KAALMOOYINKA KIRADA, KOORSOOYINKA IS-DHEXGALKA, TAAGEERADA SHAQAALAYNTA IYO KORMEERKA IS-DHEXGALKA.

HELIOS waxaa fuliyey ururka caaalamiga ah ee socdaalka (IOM) iyo hawl-wadeenadeeda waxaana maalgeliya Wasaaradda Socdaalka iyo Magangalyada.

MUDADA MASHRUUCA: JANAAYO 2022 – **JULAAY 2024**[1].
Wixii weecasho ah ee ku saabsan taariikhda xiritaanka ee dhici doonta ilaa iyo inta adeegyo kala duwan laga bixinayo mashruuca, waxaa laguugu soo gudbinayaa ogeysiis gaar ah oo la xiriira.

SHURUUDAHA U QALMITAANKA

Si aad isaga diiwaangeliso mashruuca HELIOS, ka-faa'iideystayaashu waa inta la kulmaan **DHAMAAN** shuruudaha soo socda:

1. Xaladaa Sharciga

   Kadib markii la helo ogeysiis rasmi ah oo ku saabsan go'aanka magangalyada Giriiga in lagu siinayo magangalyada caalamiga ah2 (qaxootinimo ama heerka hoosaadka)3;

2. Taariikhda aqoonsiga inuu ahaado 1/1/2018 kadib

3. Degenaanshaha waqtiga ogeysiiska go'aanka magaangalyada caalamiga ah
   - 3.1. Diiwaangelin rasmi ah mid ka mid ah hoyga nidamka soo dhowenta Griiga (Xarunta soo-dhowaynta iyo Aqoonsiga (RIC), hoteelada ama guri ku yaal barnaamijka ESTIA, PRO.KE.KA) sida lagu xaqiijiyay liisaska ay wadaagaan jilayaasha ay khusayso IOM ama dukumeenti la xidhiidha oo uu bixiyay ka faa'iidaystaha.

   AMA
   - 3.2. hoyga ama barnaamijyada guryeynta badbaadinta ee la heli karo oo maamulada ama NGO-yada ay maalgeliyaan oo taageeran. (tusaale ahaan kiisaska LGBTQI+, badbaadayasha SBGV, dhibanyaasha tahriibinta caruurta aan lala socon) Sida uu xaqiijiyay wakiilku.

U-qalmitaanka waxaa lagu xaqiijin doonaa kiisaska aan buuxin shuruudaha kor ku xusan si ku -meel -gaar ah marka la soo gudbiyo ama si toos la xiriiro shaqaalaha HELIOS ama mid ka mid ah kanaalada isgaarsiinta HELIOS

DIIWAANGALINTA

Si aad iskaga diiwaangeliso HELIOS, ka-faa'iideystayaashu waa inay saxeexaan bayaanka kaqeybgalka mashruuca HELIOS, kuwaasoo cadeynaya inay fahmayaan oo aqbalayaan xaqa iyo waajibaadka ka dhashay ku qoritaankooda mashruuca. Taariikhda saxeexa bayaanka kaqeybqaadashadu wuxuu bilaabmayaa qoritaanka ka-faa'iideystayaasha mashruuca.

[1] Bixinta adeegyada mashruuca waxay ku xiran taahay wadida iyo helitaanka maalgelinta.
[2] Macluumaadkan wfaxa ay IOM ku ururisaa dukumeenti, ha ahaato mid asal ah ama koobiyo, oo ay bixiyeen ka-faa'iideystayaasha oo ay ka helaan mas'uuliyiinta ama Adeegga magangalyada Giriiga. Waa in la ogaadaa in dukumeentiyada ay haystaan ka-faa'iideystayaasha ay aad u kala duwan yihiin iyadoo ku xiran nooca Xafiiska Magangalyada Gobolka iyo muddada bixinta. Xaalado gaar ah oo taariikhda ogeysiinta aan la heli karin sababo la xiriira tafaasiisha farsamo ee ka dhalatay xog ururinta, taa beddelkeeda taariikhda go'aanka lagu siinayo ilaalinta caalamiga ah ayaa la isticmaalaa.
[3] Qaraabada ka-faa'iideystayaasha ilaalinta caalamiga ah ee lagu wareejiyay Giriiga iyada oo loo marayo hababka dib-u-midaynta qoyska ama la siiyay "ισόχρονη άδεια διαμονής" waxay xaq u leeyihiin inay isdiiwaangeliyaan oo ay ka faa'iidaystaan nidaamka HELIOS, ilaa iyo inta xubinta qoyska ee Giriigga ay siisay ilaalinta caalamiga ah oo la diwaan geliyin doonaa ama lagu diiwaan galiyay nidaamka.

Dhamaan dadka waaweyn ee reer walba waxay ubaahanyihiin inay saxeexaan Bayaankan kaqeybgalka. Qaab dhismeedka mashruuca HELIOS, reeraha ayaa loo fahmay sida soo socota:

- Dadka ka waaweyn (18 jir iyo wixii ka sareeya) keli buu noolaadaa;
- Qof kasta oo ka tirsan qoyska wada nool. Qoysku wuxuu ka kooban yahay (a) waalid(s) iyo carruurta aan qaangaarin ee ku tiirsan, dhamaan is laa nool; qaraabad darajada labaad iyo sare sida ayeeyada, Adeeryada, ilma adeer, beelaha, adeer iyo kuwa kale looma tixgaliyo inay qayb ka yihiin qoyska;

Ka-faa'iideystayaasha uqalma in laga diiwaangaliyo mashruuca HELIOS waxaa lagu casuumay inay ka soo qayb galaan fadhiyada macluumaadka halkaasoo ay fursad ugu leeyihiin inay wax badan ka bartaan oo ku saabsan, hadday rabaan inay iska diiwaangeliyaan mashruuca, saxiix *Bayaanka Kaqeybgalka.* Kalfadhiyada macluumaadku waxay u dhacaan si joogto ah dhammaan xarumaha guryo furan, RICs, Xarunta barashada is dhexgalka bulshada (ILCs) kuwaas oo ka shaqeeya qaab dhismeedka HELIOS iyo meelo dheeraad ah kuwaas oo lala socodsiinayo ka-faa; iideystayaasha u heellan HELIOS markii loo baahnaa.

MUHIIM! WAQTIGA UGA DAMBEEYA EE DIIWAANGELINTA: Kafaa'iideystayaasha waxay iska diiwaan gelinkarraan mashruuca[4] **12 bilood gudohooda iyada oo laga soo tirinaayo ogeysiiska aqoonsiyadooda**- waxayna ku xiran tahay muddada mashruucu socdo. Tusaale ahaan, kafaa'iideystaha loo ogeysiiyo aqoonsiga 28 Julay 2022 waqtiga isdiiwaangelinta waxaa loo dejiyey 28 Julay 2023.
Ka-faa'iideystayaasha UMC taariikhda ogeysiinta aqoonsigooda waxay xaq u leeyihiin inay iska diiwaan geliyaan mashruuca ka dib markay qaangaaraan[5].

MIYAAN SAXEEXI KARAA CADDEYNTA KAQEYB QAADASHADA KADIBNA GOAANSADAA INAAN KA LAABTO HELIOS?

HAA, saxeexida cadeynta ka qeybqaadashada kuma xirna inaad wax sameyso laakiin kaliya waxay hubineysaa inaad kujirto meel aad kaga faa-iideysaneyso adeegyada HELIOS. Si kastaba ha noqotee, si loogafaa'ideysto adeegyadan, waxaad ubaahantahay inaad u hogaansanaato qawaaniinta 'HELIOS' sida hoos lagu sharraxay.

ADEEGYADA AY BIXISO HELIOS

TAAGEERADA NOLOL MADAX-BANAAN IYO KAABITAAANKA KIRADA

Ka-faa'iideystayaasha mashruuca HELIOS ayaa helaya macluumaad, caawinaad iyo taakuleyn dhaqaale oo loogu talagalay taageerida iyo kor u qaadida nolol madaxbanaan. Gaar ahaan, ka-faa'iideystayaasha HELIOS waxaa lasiiyaa caawimaad sidii ay ku heli lahaayeen guri oo ay magacooda ugu saxeexdo heshiis ijaareed toos ah milkiilaha guriga. Hawshan waxaa loo fududeeyey:

- Aqoon- isweydaarsiyo gaar ah Hal ilaa Hal kal-fadhi oo bixiya macluumaad ku saabsan nidaamka iyo shuruudaha loogu talagalay kireynta guri ku yaal giriigga;
- Tarjumaad inta lagu jiro booqashada guriga ama tarjumaadda dukumiintiyada la xiriiraguryaha;
- Fududeynta xiriiryada milkiileyaashaguri ee daneynaya inay kireystaan gurigooda;
- Isku xulitaanka ka-faa'iideystayaasha kale ee danaynaya wadaagga guri;
- Gaadiidka ka-faa'iideystayaasha iyo alaabtooda markii loo guurayo guriga cusub ee la kireystay.

Muddada heshiis kasta waa qodob ka mid ah heshiiska u dhexeeya ka-faa'iideystaha iyo milkiilaha guriga (e.g heshiiska kirada waa la saxeexi karaa muddo hal, laba ama saddex sano ama muddo kasta oo ay ku heshiiyaan dhinacyada), weli heshiisyo kirayn oo keliya lix (6) bilood iyo kabadan waa la aqbali doonaa qaab dhismeedka mashruuca. Intaas waxaa sii dheer, muddada heshiiska kirada waa inuu daboolaa dhammaan muddada kafaaiideystuhu uu xaq u leeyahay inuu helo kaabayaasha kirada ee HELIOS. Haddii aysan taasi ahayn markii ugu

[4]Bixinta adeegyada mashruuca waxay ku xiran taahay wadida iyo helitaanka maalgelinta.

[5] Bixinta adeegyada mashruuca waxay ku xiran taahay wadida iyo helitaanka maalgelinta.

horreysay ee la soo gudbiyo, markaa kabitaannada ayaa bilaaban doona laakiin heshiiska kirada oo la cusboonaysiiyay waa in la soo gudbiyaa waqtigeeda, kaas oo buuxin doona shuruudaha kor ku xusan. Ka-faa'iideystayaasha HELIOS ayaa leh suurtogalnimada waxaana si weyn loogu dhiirigelinayaa inay tixgeliyaan wada- noolaanshaha si ay ula wadaagaan kharashyada la xiriira kirada, asxaabta ama qaraabada. Si loo helo kaabayaasha kirada, dhammaan dhinacyada qandaraaslayaasha kiraystaha ah ee ka faa'iidaystaha mashruuca HELIOS **wuxuu u baahan yahay inuu si elektaroonig ahaan u aqbalo heshiiska kirada ee TaxNet oo (ΑΑΔΕ) si cad u sheegaya magaciisa**

Kafaaiideystayaasha helay ama qaata kaabayaasha kirada ee mashaariicda kale kama heli karaan kaalmada kirada ee hoos timaada HELIOS.

MIYAAN TUSIKARAA KOOBI AH CADEYNTA KA QAYBGALKA MILKIILAHA GURIGA SI LOO FUDUDEEYO HESHIISKA KIRADA?

Haa, waxaad tusi kartaa milkiilaha guriga cadeeynta kaqeybgalka heshiiska oo qeexeyso in aad heli doontid taageero maaliyadeed xaga kirada guriga hadii uu/ay ogolaato ineey saxeexdo heshiiska kirada.

Markay saxeexeen heshiis kiro magacooda, ka-faa'iideystayaasha waxaa la siiyaa kabitaan kiro oo lagu bixiyo koontada shaqsi ee bangiga Greek. Qadarka kabidda kirada waxaa lagu bixiyaa iyadoo loo eegayo cabirka qoys walba oo ka kooban:

- **Ku-biirinta bilowga nolol madax-bannaan**, horse loosii qorsheeyey inay gacan ka haysato bixinta damaanada kirada iyo kharashkdejinta we ugu horaysa (tusaale iibsiga qalabka guriga, qalabka guryaha).
- **Tabaruc ku baxa kharashyada kirada**, lagu bixiyo bilkasta si loogu darro kharashyada kirada guriga iyo kharashaadka la xiriira kharashaadka asaasiga ah ee korontada

Bixinta bilowga ahi waxay ka koobantahay tabarucaadka bilowga nolol madax-banaan iyo tabarucaadka billaha ah ee ugu horeeya ee kirada, waxaana lagu bixiyaa laba qaybood sida ku cad jadwalka 1aad we hoose, halkaasoo sidookale lasoo bandhigayo qaddarka tabaruca ee kirad. Lacagaha la siinayo ka faa'iidaystayaasha mashruuca ayaa lagu muujiyey jaantusyada A iyo B ee hoose.

Shaxda A: Wuxuu shaqaynayaa laga bilaabo 1 Janaayo 2022 ilaa 19 Juun 2022:

TIRADA QOYSKA	**Qaybta kowad ee bixinta bilowga** (Waxay ka koobantahay qaybqayb, oo ah tabaruc si loo bilaabo nolol madaxbanaan)	**Qaybta labaad we bixinta bilowga** (waxay ka koobantahay tabarucaadka haray ee bilowga nolol madax banaan oo lagu daray bishii ugu horaysay tabarucaadka kharashyda kirada)	**Ku, tabaruca kharashka kirada** Bixintakadib bixinta bilowga ah (bisha 2ad iyo wixii ka danbeeya)
	Lasii dayey markii lasoo gudbiyo heshiiska kirada iyo dokumentiyo kale	**lagu sii daayey markii la xaqiijiyey ka bixitaanka nidaamka soo dhawaynta iyo cadeynta bixinta kirada ugu horaysa**	**Waxaa la siidaayay bil kasta markii la caddeeyo bixinta kharashyada kirada**
1	301 €	301 €	162 €
2	569,5 €	569,5 €	309 €
3	688 €	688 €	396 €
4 to 5	838 €	838 €	504 €
6+	1.060 €	1.060 €	630 €

Shaxda B: Wuxuu shaqaynayaa laga bilaabo 20 Juun 2022 iyo wixii ka dambeeya:

TIRADA QOYSKA	**Qaybta kowad ee bixinta bilowga** (Waxay ka koobantahay qaybqayb, oo ah tabaruc si loo bilaabo nolol madaxbanaan)	**Qaybta labaad we bixinta bilowga** (waxay ka koobantahay tabarucaadka haray ee bilowga nolol madax banaan oo lagu daray bishii ugu horaysay oo tabarucaadka kharashyda kirada)	**Ku, tabaruca kharashka kirada** (waxaa la bixiyaa ka dib qaybta koowaad ee lacag bixinta bilowga ah oo sii socota 11 wax ku darsiga kharashka kirada, halkaas oo tabaruca ugu horeeya ee kharashka kiraynta lagu daro qaybta labaad ee bixinta hore)
	Lasii dayey markii lasoo gudbiyo heshiiska kirada iyo dokumentiyo kale	**lagu sii daayey markii la xaqiijiyey ka bixitaanka nidaamka soo dhawaynta iyo cadeynta bixinta kirada ugu horaysa**	**Waxaa la siidaaya bil kasta markii la caddeeyo bixinta kharashyada kirada**

1	350 €	350 €	230 €
2	650 €	650 €	420 €
3	775 €	775 €	550 €
4 to 5	900 €	900 €	650 €
6+	1.150 €	1.150 €	800 €

Laga bilaabo Janaayo 1, 2022 ilaa Juun 19, 2022, ka faa'iideystayaasha waxay xaq u lahaayeen ugu yaraan lix (6) bilood iyo ugu badnaan 12 (12) bilood oo taageero kiro ah. Xisaabinta taageerada waxay ku salaysan tahay taariikhda ogeysiinta go'aanka ilaalinta caalamiga ah iyo taariikhda soo gudbinta dukumentiyada. Qoyska soo gudbiyay dukumeenti bisha lixaad ka dib taariikhda ogeysiinta waxay xaq u leeyihiin lix (6) bilood oo kabitaan kirada ah.

Ka-faa'iideystayaasha horeyba u bilaabay helida kabida kirada ka hor Juun 20, 2022 waxay xisaabin doonaan xaq u lahaanshaha kabka kirada iyagoo ka jaraya tirada faa'iidooyinka ay hore u heleen ilaa waagaas wadarta xaqa ay u leeyihiin.

Dhammaan ka-faa'iideystayaasha horeyba u helaya kabida kirada Juun 20, 2022, oo soo gudbin doona dukumentiyada Juun 20, 2022 ka dib iyo inta lagu jiro muddada hirgelinta mashruuca, waxay xaq u leeyihiin ilaa laba iyo toban (12) bilood oo kabid kirada ah[6]

> **TUSAALE:** qoyska, kakooban 4 xubnood oo la ogeysiiyey aqoonsiga 01/08/2022. Waxay u gudbiyaan shaqaalaha HELIOS TAXISNet daabacada heshiiska kireysiga 01/09/2022, oo ay la socdaaa dukomintiyada kale ee la socda; oo ay ku helaan akoonkooda IBAN qaybtii ugu horeysay ee bixinta ugu horeysa ee qadar ah **900,00 €**, halka ay weli ku noolyihiin nidaamka soo dhawaynta. Kadib markay helaan koontada akoonkooda; waxay u badanyihiin islamarkiiba inay ka baxaan nidaamka soo dhaweynta; haday rabaan inay adeegsadaan adeegyada gaadiidka HELIOS, oo ay u guuraann gurigooda cusub.markay ka baxayaan hoygoodii horre reerkii waa in ay hubiyaan inay ka codsaday shahaadada bixitaanka hawlwadeenada ay khusayso (tusaale maareeyaha goobta, hawlwadeen ESTIA) lana wadaagan shaqaalaha HELIOS. Marka lala wadaagayo shahaadada bixitaanka shaqaalah HELIOS, reerku waa in ay sidookale ku darran xirmada soo gudbinta rasiidh bangi oo cadeynaya macaaamil/ keridhit koontada IBAN ee milkiilaha guriga kirada ugu horeeya ee bilaha ah; markay hesho shahaadada bixinta iyo cadaynta lacag bixinta ee aan soo sheeganay, HELIOS waxay ku bixin doontaa akoonka IBAN ee qoyska qaybta labaad ee bixinta bilowga ah, qadar ahaan **900,00 €**, oo ay ku jirro inta harsan ee tabarucaada bilowga ah nolol madax-banaan iyo kaabitaanada kirada ee bilaha ah. Laga bilaabo waqtigas wixii ka danbeeya qoysku wuxuu usoo gudbindoonaa HELIOS bishiiba mar caddeyn bixinta lacagta kirada bilkasta, HELIOS ayaa siindoonta ayaga bilkasta qadarka **650,00€** iyadoo la raacayo shuruudaha ay ka qaban imaatinka koorsooyinka isdhexgalka waa kala kulmay. Wadar ahaa. Waxay helidoonaan 12 billood oo ah Kiro bille ah, ayada oo la tixgelinaayo in kaalmada kirada ee bilaha ah ee ugu horaysa lagu darro qaybta labaad ee bixinta bilowga ah, qoysku wuxuu helidoonaa wadar ahaan **8.950,00 €,** inta at xaq u leeyihiin HELIOS.

Kafaa'iideystayaasha waxay leeyihiin **12 bilood** oo ka bilaabata taariikhda ogeysiintooda si ay u soo gudbiyaan dukumiintiyada loo baahan yahay. Ka-faa'iideystayaasha ku diiwaangashan mashruuca in kasta oo ayan buuxin shuruudaha u-qalmitaanka caadiga ah, iyo sidoo kale kiisaska ka-faa'iideystayaasha la siiyay ilaalinta caalamiga ah sida ku cad qaab-dhismeedka sharciga ee la xiriira marka ay weli yihiin caruur aan qaan-gaarin oo aan lala socon, waqtigii ugu dambeeyay si ay u gudbiyaan dukumentiyada muhiimka ah mashruuca waxa loo dejiyay laba iyo toban (12) bilood laga bilaabo taariikhda diiwaan galinta mashruuca. Haddii ka-faa'iideystayaasha ay ku guuldareystaan inay la kulmaan wakhtiga ugu dambeeya, qalmitaanka ay u leeyihiin inay helaan kaalmada kirada ayaa joogsanaysaa.

<u>Si loo helo qaybta ugu horeysa ee bixinta bilowga ah ee HELIOS kaabayaasha kirada, ka-faa'iideystayaashu waa inay buuxiyaan **Dhammaan** shuruudaha soo socda oo dhan:</u>

1. Ka diiwaangashan HELIOS adoo saxeexay bayaanka kaqeybgalka;
2. Sii shaqaalaha HELIOS:
   a. Caddeyn ah *Taxisnet* soo gudbinta heshiiska kirada ee **Xariirka TaxisNet (ΑΑΔΕ)**, lagu **aqbalay,** dhammaan dhinacyada Sida kiraystayaasha ka faa'iidaysanaya mashruuca – heshiiska kirada oo leh wax ka yar lix (6) bilood lama aqbalikaro, kumana kireyn karo heshiisyada taariikhda bilawga ah in ka badan laba (2) bilood kahor kafaaiideystaha HELIOS:

[6]Haddii ay dhacdo in taariikhda bilawga heshiisku ka danbeyso taariikhda soo gudbinta dukumeentiga, waxa la isticmaali donna taariikhda bilawga heshiiska halkii laga isticmaali lahaa taariikhda soo gudbinta dukumeentiga si loo xisaabiyo xaqa taageerada.

b. Midkastoo oo reerka katirsan, dukumeenti caddaynaya xaaladdooda ka faa'iideystayaasha ilaalinta caalamiga ah - kuwaaso - iyo kuwo kale – taas oo ah karaka magangalyo-doonka lagu shaabadeeyey *"Inta la sugayo bixinta ogolaanshiyaha joogitaanka"*, nooca cusub ee Kaarka Magangalyo-doonka, ama Ogolaanshaha Deganaanshaha Giriigga ama baasaboorka.
c. Dukumenti muujinaya faahfaahinta shaqsiga Bangiga Giriigga ee ka-faa'iideystayaasha kaas oo kirooyinka kirada loo wareejin doono – waa inay si cad u muujisaa lamarka IBAN iyo magaca. Qofka weyn ee qoyska ah oo magaciisu heshiiska ku jiro. Kabista kirada **looma** wareejin karo karaka ay ka-faa'iideystayaashu ku helayaan ESTIA kaalmo lacageed oo loogu talagalay baahiyahaaasaasiga ah
d. siiyaan shaqaalaha HELIOS warqad daabacan oo ay ku xaqiijinayaan milkiilaha akoonka IBAN; ama maareeyaha hantida (sida u muuqata mid ka mid ah heshiiska ijaarka, ama wakiil rasmi ah, ama sida lagu sheegay Shuruudaha Gaarka ah ee Heshiiska).

MUHIIM : ISLAMRKA KA-FAAIIDAYSTAYASHU AY HELAAN BIXINTOODA UGU HORAYSA EE KAABAYAASHA KIRADA; WAA IN AY ISLAMARKIIBA KA BAXAAN MEELIHII AY DEGENAAYEEN, OO AY U GUURAAN GURIGA LAGU CADEEYEY HELIOS, HADIIKALE DHAMAAN ADEEGYADA HELIOS WAA LA JOOJINAYAA OO KA-FAAIIDEYSTAYAASHA WAXAA LAGA TIRAAYAA DIIWAANGELINTA MASHRUUCA IYADOO AANU LAHAYN XAQA AAD U LEEDAHAY IN AAD DIB ISU QQORTO.

Qaybta labaad ee bixinta bilowga ah ee kaalmooyinka kirada ee HELIOS ayaa lagu sii daayaa

1. Xaqiijinta ka bixida qoyska ee wakhtiga ku haboon ee hoyga soo dhaweynta (shahaada bixitaanka ee ay bixiso hay'adda oo uu u gudbiyo ka-faa'iideystayaasha shaqaalaha / khadka caawinta ee HELIOS);
2. Xaqiijinta guusha ee joogitaanka qoyska ee gurigooda cusub ee kiraysteen
3. Soo gudbinta risiidh bangi oo caddaynaaya macaamil/kiridhitka koontada milkiilaha ee IBAN kirada ugu horaysa ee bilaha ah.

Si loo helo kharashka billaha ah qoys walba waa inuu kasoo baxaan shuruudahaan:

1. **Siinta** shaqaalaha Helios **bil kasta** caddaynta in kirada bishii la bixiyay loo diray mulkiilaha IBAN-kiisa ee lagu dhawaaqay. Dukimiintiyada loo aqbali doono inay cadeyn u yihiin bixinta waa:

    a. Xaqiijin oo ku saabsan macaamil xawaalad bangiga oo daabacan markii codsi ka-faa'iideysteha uu ka helo hawl-wadeen ka tirsan laanta bangiga wuxuu si cad u muujinayaa faahfaahinta heshiiska kirada (magaca ka-faa'iideystaha, magaca milkiilaha guriga, lambarka heshiiska),
    b. Xaqiijinta lacag bixinta elektaroonig ahaan ee ka faa'iideystuhu daabacay, Si cad muujinaya faahfaahinta heshiiska kirada (magaca ka-faa'iideystaha, magaca milkiilaha guriga, lambarka heshiiska) qeybta qoraalada ee macaamil.

2. Keen **bill walbaa** daabacaadda TaxisNet ee la cusbooneysiiyay ee heshiiska kiradahaddii
3. Tag koorsooyinka isdhaxgalka qasabka ah adigoon ka badineyn xadka maqnaanshaha la oggol yahay, haddii la codsado:

Haddii kafaa'iideysteyaashu ku guul darreysto inuu siiyo shaqaalaha HELIOS caddeyn waqtiyaysan oo la xiriirta bixinta kirada billaha ah iyo dukumentiyada kale ee khuseeya, si toos ah ayey u luminayaan xaqa lahaanshaha kaalmooyinka kirada laga bilaabo xilligaas wixii ka dambeeya.

MUHIM: LACAGAHA LA SIINAAYO MILKIILAYAASHA GURYAHA KAASH AHAAN LAMA AQBALIKARO.

IOM waxay ilaalinaysaa xaquuqda lahaanshaha booqashooyin kormeeree guryaha kirada ah. Iyo inay joojiso bixinta kabida kirada marxaladkasta oo ka mid ah muddada uu ka faaiidaystuhu xaq u gu leeyihiin taakulaynta mashruuca hadii aan la daboolin shuruudaha gudaha.

BIXINTA KOORSOOYINKA ISDHEXGALKA

Qaabka dhismeed mushruuca HELIOS, koorsooyinka isdhexgalka waxaa lagu bixiyaa xarunta isdhexgalka (ILCs) dhulka Giriigga iyo Jasiiradda Crete. Koorsy kasto waa 360 saacad waxbarinta muddo qiyaas **lix (6) bilood**, qof kasto wuxuu ka qayb galayaa Seddex saacadood (3) maalin kasto, Shan (5) maalimood usbuucii. Koorsooyinka isdhexgalka ayaa heli karta dhammaan kafaaiideystayaasha ku qoran HELIOS iyo ugu yaraan dada 16 sano, waana ku qasab kafaaiideystaasha qaata kaabyada kirada

Waalid walbaa wuxuu ubaahanyahay inuu jadwal u sameeyo xanaano caruurtiisa iyadoo loo eegayo baahidooda, xarunta barashada waxay bixisaa koorsooyin ilaa saddex (3) fasallo ah maalintii iyo in la habeeyo goobo carruurtu ku habboon oo lagu marti-geliyo carruurta da'doodu u dhaxayso tilmaan ahaan 2 ilaa 7 sano jir halka waalidku dhigto.

Gaar ahaan, koorsooyinka isdhexgalka waxay ka koobankoobanyihiyaalaha soo socda:

- **Qaybta Luuqadda Griiga**: wadarta 280 saacadood, kafaa'iideystayaasha waxaa laga rabaa inay bartan aasaaska luqadda Griigga turjumaan la'aan. Fasalada ayaa la aasaasay iyadoo la tixgelinaayo heerka akhris ee ka-faa'iideystayaasha,
- **Qaybta xirfadaha Fudud Soft Skill**: Wadarta 80 saacadood, kafaa'iideystayaasha waxaa laga raba inay bartan Hiddaha dhaqanka, Xirfadaha Nolosha iyo shaqada, macalin khibrad leh ayaana la socondoonaa, iyo dhexdhexaadiyeyaasha dhaqanka. Hawlaha bannaanka ayaa sidoo kale la sameeyaa (e.g. Booqashada matxafka) iyada oo qayb ka ah koorsooyinka, si uu ka faa'iidaystuhu fursad ugu helo barashada xirfadaha cusub iyo ku celcelinta xirfadahooda. Gaar ahaan tan, cutubka wuxuu ka kooban yahay qaybaha soo socda:
    - Tilmaanta Dhaqanka: Fikrada ku saabsan dhaqanka Griiga, Taariikh, dhaqan iyo caadooyin casri ah;
    - Xirfadaha nolosha: fasalo loogu talagalay hagaajinta xiriirka iyo wada shaqaynta dadka kale; masuuliyad shaqsiyeed iyo mid bulsho; Waxyaabaha la taaban karo ee muhiimka u ah nolo maalmeedka Griiga (e.g. sida loo isticmaala gaadiidka dadweynaha, sida loo furao lambar bangi, sidee aad u hesho waxa aad u baahantahay);
    - Udiyaarsanaata shaqo: Macluumaad sida loo helo shaqo, Matalan hay'adda shaqaalaysiinta ku sabsan (OAED), isagoo adeegsanaya shabakad ama wargeys; waxyaabaha la taaban karo eek u saabsan isudiyaarinta shaqada (e.g. ka qaybgalka wareysiga shaqada); xirfadaha jilicsan, xalinta dhibaatada.

MIYAAN HELI DOONAA SHAHAADO KU SAABSAN LUQADEYDA GRIIGA MARKII AAN DHAMAYSTO KOORSADA?
Iyada oo ku saleysan waxqabadkaaga, macalinkaaga ayaa qiimeyn doona wuxuun kuu gudbin doonaa imtixaanka rasmiga ah ee, haddii ay kuwaani la mid yihiin shuruudaha looga baahan yahay imtixaanka, isaga/iyada ayaa sameyn doonta cadaynta luqadda Griiga. Ujrada imtixaanka waxaa daboolaya mashruuca.

Si aad iskaga diiwaangeliso koorsooyinka is dhexgalka, ka-faa'iideystayaashu waa inay la kulmaan **DHAMMAAN** waxyaabaha soo socda:

1. In lugu qoro HELIOS iyo *Bayaanka kaqeybgalka* aad saxiixdaa;
2. Inaa aad kaweyn tahay 16 sano.

Imaanshaha koorsooyinka waa ku **qasab** dhammaan ka-faa'iideystayaasha qaata cawimaada kirada. marka laga reebo ka faa'iidaystayaasha ku diiwaangashan barnaamijyada waxbarashada tooska ah (sida, dugsiga dadweynaha, jaamacadda dadweynaha). Koorsooyinka isdhexgalka waxaa lagu bixiyaa shaqsii ahaan ama meel fog iyada oo la isticmalayoo e-learning.

Waajibaadka ka qaybgalka koorsooyinka isdhexgalka waxa loo qaadi karaa si **joogto ah (ka dhaafid) ama si ku meel gaadh ah, iyadoo lagu salaynayo qiimaynta ku haboon ee shaqaalaha mashruuca.**

Ka-faa'iideystayaasha aan looga baahnayn inay ka qayb galaan Koorsooyinka, si waafaqsan qodobada kor ku xusan, waxay si ikhtiyaari ah isku qori karaan Koorsooyinka wakhti kasta laba iyo toban (12) bilood gudahooda ee diiwaangelinta Mashruuca iyo gudaha wakhtiga mashruuc.

MUHIIM: kafaa'iideystayaasha qaata kaabayaasha kirada waxay u baahan yihiin inay iskood isugu soo bandhigaan xarumaha waxbarshada iyo isdhexgalka, si ay iskaga diiwaangeliyaan koorsooyinka isdhaxgalka **10 maalmood oo maalmaha shaqada ah** ugu danbayn, iyada oo laga tirinaayo maalinta markii la helay qaybtii labaad ee bixinta ugu horeysay. Haddii ka-faa'iideystayaashu ay u hoggaansami waayaan shuruudahan, bixinta kharashka kirada waa la joojin doonaa, ugu dambeyntiina, haddii aysan isku qorin koorsooyinka la qabsiga waqtigii loogu talagalay, waxaa laga saari doonaa diiwaanka mashruuca HELIOS.

Kafaaiideystayaasha isu soo bandhigaya Xarunta waxbarashada iyo is dhexgalka, waxaa laga codsanayaa inay sameeyaan imtixaanka meeleynta ah, si ay u qeexaan heerka fasalka ay tahay inay iska diiwaangeliyaan oo ay helaan macluumaad gaar ah oo ku saabsan fasallada jirra.

Ka -faa'iideystayaashu waxay xaq u leeyihiin tiro maqnaansho ah inta lagu jiro fulinta koorsooyinka is -dhexgalka. Gaar ahaan, ka -faa'iideystayaashu waxay ka joogsan karaan koorsooyinka muddo dhan **72 saacadood** dhammaantood inta lagu jiro muddada 6 bilood ah. Faahfaahinta la xiriirta waxaa si cad loogu soo bandhigay Buug -gacmeedka Ardayda, kaas oo ka -faa'iideystayaashu helayaan marka la qoro Koorsooyinka Is -dhexgalka.

ka-faa'iideystayaasha ka badiya oo dhaafaya xadka 72 maqnaansho. maqnaanshaha sababo la xiriira isbitaall (e.g. hospitalization) waa inay dib isugu qoraan koorsooyinka is dhexgalka si ay ugu sii socdaan helida faa'iidooyinka mashruuca HELIOS. Xaaladdan oo kale, shaqaalaha HELIOS ayaa go'aamin doona shuruudaha dib-isugu-qorista (e.g. haddii ka-faa'iideystayaashu u baahan yihiin inay dib u bilaabaan koorsada is-dhexgalka ama haddii lagu qori karo fasallada horey u socday).

MAXAA DHACA HADDII AAN KA BADIYO LANBARADA MAQNAANSHAHA?
Kafaaiideystayaasha ka saraysiiya maqnaanshaha guud (72 saacadood muddada koorsooyinka oo dhan) waa laga saari doonaa faa'iidooyinka mashruuca HELIOS. Qoysaska, xubin qoyska mid ah(s) ay dhaaftay xadka maqnaanshiyahooda ayaa laga saarayaa faa'iidooyinka mashruuca iyo qadarka kabitaanada kirada ee qoyska ayaa lagu dhimaya qaddarka u dhigma tirade xubnaha ee ay dhaaftay xadka maqnaanshaha.

FADHIYADA LA-TALINTA SHAQADA IYO HAWLAHA KALE EE LA XIRIIRA SHAQAALAYNTA

Ka-faa'iideystayaasha mashruuca HELIOS waxay fursad u leeyihiin inay kafaa'iideystaan taageerada shaqaalaysiinta si ay u bartaan suuqa shaqada Giriigga iyo qaabka cilmi barista shaqada, iyo isbarbar dhiga, inay helaan kor u qaadista wacyiga shaqadooda. Qaab-dhismeedkan ka-faa'iideystayaasha ku qoran HELIOS waxaa lasiiyaa shan (5) faadhi shaqo latalin shaqsiyeed ah oo soconaya hal (1) saac midkasta la-taliyayaal shaqo oo ka caawinaya inay horumariyaan qorshe shaqo iyaga oo qiimeynaya iyo awooda ay leehihiin iyaga oo ku hagaya ilhah xirfadeed macluumaad iyo shaqa raadin. Markii loo baahdo kafaa'iideystayaasha waxaa sidoo kale lagu wargeliyaa suurtagalnimada ay u ballaariyaan sumcadooda waxbarasho.

Kalfadhiyada latalinta shaqada shaqsiga ah waxay ka dhacaan xarumaha isdhaxgalka bulshada shaqsi ahaan ama cawimaad si fog ah waana qasab si looga fa'iideysto nashaadaad dheeraad ah oo laxiriira shaqada, xaqiiq ahaan, kafaa'iideystayaasha leh tacliinta ay khusayso /ama waayo-aragnimada waxay fursad u leeyihiin inay marin u helaan shahaadooyinka rasmiga ah (tusaale ahaan. Laysanka darawalka shahaadooyinka ECDL luuqadda shisheeye) si loo kordhiyo awoodahooda shaqo. kharashaad kasta oo laxiriira shahaadooyinka rasmiga ah iyo wixii dukumiinti kale ah ee loogu baahanyahay ujeeddooyinka shaqaalaynta (tusaale ahaan, tarjumaadda rasmiga ah ee dukumiintiyada baaritaannada caafimaad ee degdegga ah) waxaa daboola mashruuca HELIOS markaay qiimeeyaan shaqaalaha HELIOS, uqalmitaanka kafaa'iideysta kasta waxaa lagu qiimeeyaa kal-fadhiyada latalin shaqo, imaanshahiisa taas oo shardi u ah si loo helo adeeggan.

SHAQAAALAHA HELIOS MA II HELIDOONAAN SHAQO?
MAYA. Si kastaba ha noqotee, Shaqaalaha HELIOS waxay bixin doonaan taageero ay ku fududeeyaan isdhexgalkaaga suuqa Shaqada oo kaa caawinaya inaad sahamiso fursadahaaga shaqo raadinta ee Giriigga.

Si looga faaiideysto howlaha la xiriira shaqaaleysiinta, kafaa'iideysteyaashu waa inay lagu qoro HELIOS adiga oo saxiixay Baaqa Ka -qaybgalka.

LA SOCODKA IS DHEXGALKA.

Ka-faa'iideystayaasha HELIOS waxaa caawiya kooxo u heellan korjoogteyn iskudhaf ah oo ka kooban shaqaalaha bulshada iyo turjubaanno mas'uul ka ah inay la socdaan horumarkooda isdhexgalka iyo inay taageeraan wixii baahiyo la xiriira isdhexgalka. Inta hawshani socoto, ka-faa'iideystayaasha waxaa lagu taageeraa inay horumariyaan xiriirrada ay la yeeshaan bulshada martida loo yahay, Inaad baratid adeegyada

guud iyo hanaanka xafiisyada bulshada iyo maamulka ugu dambeyntii inaas noqoto meel si kalsooni leh loogu dhex maro bixiyeyaasha adeegga bulshada ee Griiga markay ka qalinjabiyaan mashruuca.

Gaar ahaan, kooxaha kormeerka isdhexgalka waxay diiradda saarayaan qiimeynta kafaa'iideystayaasha kaqeybgalka bulshada dhexdeeda martigelinta iyagoo siinaya talo ku saabsan waajibaadka xafiisyada iyo adeegyada lagu bixiyo heerka maxalliga ah Hawlaha korjoogteynta isdhaxgalka ayaa sidoo kale tixraaca horumarka ay sameeyeen kaqeyb galayaasha iyadoo laxiriira adeegyadii ay bixiyeen mashruuca HELIOS, oo ay kujiraan koorsooyinka isdhaxgalka iyo kaqeygalayaasha kafaa'iideystayaasha nolol madax banana arrin kasta oo laxiriirta ilaalinta oo ay aqoonsadeen kooxaha korjoogteynta Isdhaxgalka waxaa loo gudbinayaa bixiyeyaasha adeega maxalliga ee ay quseyso. Intaa waxaa dheer, adeegyada taageerada bulsheed ee nafsiga ah ayaa la bixin karaa, sida koox iyo sida kulamo gaar ah si wax looga qabto dhaawacyada dagaalka, PTSD, iyo hawlo kale oo khuseeya kuwaas oo loogu talagalay dadka ka faa'iidaystayaasha ah.

KOOXAHA KORMEERKA IS DHEXGALKA MIYEY II RAACIDOONAAN ADEEGYADA GUUD EE GIRIIGA?
MAYA. Si kastaba ha noqoto, kooxdu waxay bixin doonaan wixii talo iyo taageero ah ee loo baahdo oo ku saabsan waajibaadkaaga xafiisyada ee adeegyada guud ee Griiga.

Kulamada lala yeelanayo kafaa'iideystayaasha ayaa loo qorsheeyay shaqsi ahaan xarumaha waxbarashada isdhexgalka ama sii fog ah iyadoo lagu saleynayo baahidooda sida ay u qiimeeyeen shaqaalaha HELIOS si loo hubiyo inta qiimeynta lagu guda jirro. kulamadaas kafaa'iideystayaashu waaxay fursad u leeyihiin inay ka wada hadlaan wixii carqalad ah ee ay kala kumaan arrimaha la xiriira hannaanka isdhexgalka iyo in ay bixiyaan jawaab celin ku saabsan howlaha mashruuca ee loo yaqaan mashruuca HELIOS.

KA ERYIDA ADEEGYYADA HELIOS

Haddii ay dhacdo shil amni oo halis ah mid ka mid ah ka-faa'iideystayaasha, nidaamyada shaqada looga eryay **dhammaan** adeegyada mashruuca ayaa isla markaaba la bilaabayaa. Shaqaalaha Helios waxay u heellan yihiin inay u fidiyaan adeegyada mashruuca ka faa'iideystayaal ka diiwaangashan HELIOS, waxaana loo baahan yahay iskaashi laba geesood ah oo arrintan la xiriira dadaalka labada dhinac si loo gaaro natiijooyin wanaagsan.

NALA SOO XIRIIR!

Hadi ladahai suaalo oo ku saabsan mashruuca HELIOS, Fadlan nala soo xidhiidh:

- Email ahaan **iom_helios_info@iom.int.**
- WhatsApp/Telegram **khadhka caawinta**, laga soo bilaaboo 9am – 3pm, Isniin ila Jimco:

+ 30 690 665 6134	Arabic	**+ 30 690 695 6107**	Sorani-Kurmanji-Turkish
+ 30 690 986 8980	English-Greek-French-Ukrainian-Russian	**+ 30 690 665 6125**	Farsi-Pashto-Urdu-Hindi-Punjabi

AFEEF: Haddii ay dhacdo in ay is khilaafaan nooca Ingiriisiga ah ee dukumeentigan iyo tarjumadiisa luqadaha kale, fadlan tixraac nooca Ingiriisiga, maadaama loo arko nooca rasmiga ah.